



Makala hadashaa curuurtaada ciyaaraha muuqaalka ah?





Makala hadashaa curuurgaada ciyaaraha?

Ilaa intee jeer ayaad laciyaartaa ilmahaaga ciyarta muuqaalka ah?

Mataqaanaa qaybaha ciyaaraha ee cunugaagu dheelo?


Mataqaanaa inta jeer ee cunugaagu dheelo ciyarta muuqaalka ah?


Mataqaanaa cabrada da'da ee ciyaaraha muuqaalka ee cunugaaga?

Ma iskuraacdeen cunugaaga mudada uu cunugaagu dheeli karo ciyaaraha muuqaalka ah?

**Caruur badan iyo dadka da'yarta ah ayaa waqtii
badan galiya ciyaaraha muuqaalka ah, laakiin
arintaani waxay dhibaato noqotaa marar dhif ah.**

Hadba sida waalidku xili hore u ogaado dabeeecadaha ciyarta ee caruurtooda, ayay kasii fududahay inay gaadaan caqababaha kadhalan kara. Adigga iyo qoyskaaga ayaa go'aaminaaya waxa waqtii lagalinaayo, iyo waxa la aqbali karo. Caruurta kaladuwani ayaa leh baahiyo iyo xiisayaal kaladuwani, laakiin dhamaan caruurtu waxay ubaahanyihiin nidaamin iyo xadidaado. Inaad xadidaado usamayso waxay sidoo kale kucaawinaysaa markay rabshad kacdo. Sidaas awgeed, biloow xili hore inaad caruurta kalahadasho ciyaaraha, kadibna go'aanso waqtiga ay kubixinayaan, iyo nocyada ciyaaraha loo oglaan karo.





Kahadah ciyaaraha muuqaalka - iskuna raaca

- Kulugyeelo ciyaartooda. Waxkabaro qaabka ay carurtu ulajaanqaadayaan aduunyada. Iskuday inaad fahanto sababta ay ujecelyihii muqaalada ciyarta, halkii aad kahor itagi lahayd
- Adoo ayaga kaashanaaya udaji xadud, abaalmarina sii markay qorshahaad dajisaan raacaan
- Iskajir inaad aad ugu qayliso iskana jir adeegsiga erayada sida “laqabsiga ciyarta muuqaalka” markaad cunugaaga lahadlayso, maadaama erayada noocaas ah aya waxyeelays karan wadahadalka wanaagsan
- Lahadal waalidiinta kale islana wadaaga khibradaha iyo talooyinka, laakiin xasuusnoow in qaababka ufiican ilmaha dariskaaga ah aysan ufiicnaan karin qoyskaagana
- Lasheekayso ilmaha, oo adigu kaligaa ha ukhodbayn. Arintaan labadiinaba way idin qusaysaa. Waalidiintu waa inay fursad uhelaan ay su'aalo kuwaydiyaan, caruurtana waa in waqtii ay jawaab sharaxan ubaxshaan lasiiyaa

Su'aasha kasoo dhalaalida shaqada

- Meeqa ciyaarood maalintii/asbuucii aaya lagu dheeli gurigeena?
- Maxaan cadadkaas ugo'aansanay?
- Xadidaaduhu makaduwanaan lahaayeen hadaan kahadlayno akhrinta buugta ama wax sawirada?
- Matahay inaan markasta raacno cabirada da'da loogu talagalay mise qoyska aaya qiimayn iskiis ah samaysan kara oo ku aadan ciyaaraha ilmuhi dheeli karaan? Waa maxay sababta? Maxaa diidaaya?

